

SU'AALAH A INTA BADAN LA ISWEYDIYO

SIDEEN U HUBIN KARAA HEERKA RUQSAD LA OGOLAADAY?

Booqo: bit.ly/permitsearch. hoos u soco oo geli cinwaanka ama nambarka ruqsadda.

WAAXDA ADEEGYADA KORMEERKA (ISD) SIDE E AYEY U QIIMEYSAA MAQAAYADAH A IYO BAABUURTA CUNTADA?

Qeybta Caafimaadka ee waaxda waxay kormeeraan dhammaan maqaayadaha iyo baabuurta cuntada wareega ugu yaraan hal mar sanadkii. Si aad u aragto heerka ganacsiga adeegga cuntada, booqo: bit.ly/mayorsfoodcourt

JIIRKA AMA DOOLIGA DHIBAATO MAKU HAYAA XAAFADAADA?

Wac nambarka 311 ama isticmaal app-ka 311 si aad u gudbis walaac. Kooxda Qeybta Deegaanka ee Waaxda ayaa isku dubaridi doona baaritaan. Haddii aad cayayaan ku aragto gurigaaga, la xiriir milkiilaha gurigaaga. Haddii uu kuu soo jawaabi waayo, wac nambarka 311 ama kala xiriir Qeybta Guriyeynta ee Waaxda Kormeerka: 617-635-1010.

SIDEEN U DIIWAANGELIN KARAA HANTIDAYDA MAGUURTADA AH EE KIRADA LOOGU JIRO?

Waxaad qaab onlayn ah kaga diiwaangalin kartaa halkaan: bit.ly/isdrentalregistration

DHIBAATO MAKU QABTAA XAALAD GURI OO IS DHEXYAAL AH IYO/AMA XAFASH FARA BADAN?

Wac nambarka 311 ama iimayl ku dir isd@boston.gov si aad u gudbis cabasho. Kooxdeena ayaa sameyn doona baaritaan si ay kaaga caawiyaan arinkaas.

SIDEEN ULA SOCON KARAA HEERKA MASHRUUCA HORUMARINEED EE KA SOCDA XAAFADDEYDA?

Si aad u aragto raadraaca racfaanka ee gudiga ZBA, booqo bit.ly/zbatracker

SIDEEN UGU CODSAN KARAA FOOMKA GAABAN EE RUQSADA QAAB ONLAYN AH?

Fadlan booqo bit.ly/isdshortforms si aad u daawato muuqaalka oo sharaxaya sida qaab onlayn ah loogu codsado foomka gaaban ee ruqsadda.



Inspectional Services

WEBSAAYD: www.boston.gov/isd
IIMAYL: ISD@boston.gov
TALEEFAN NAMBAR: 617-635-5300
INSTAGRAM: @ISDBOSTON
FACEBOOK: Boston Inspectional
Services Department
X: @ISDBOSTON

1010 MASSACHUSETTS AVE
FLOOR 5
BOSTON, MA 02118

CITY of **BOSTON**

WAAXDA ADEEGYADA KORMEERKA



MAXAA LAGA FILAN KARAA KORMEERAHA WAAXDA ISD

IKormeerayaasha waxay ka jawaabaan cabashooyinka loogu soo gudbiyo telefoonka, iimayl ahaan, ama si fool-ka-fool ah. Haddii ay guri ama goob ganacsi ku arkaan xadgudubyo, waxay soo saari doonaan warqad ciqaabeed.

Iyadoo ay ku xirantahay xajmiga xaaladda, waxay siin doonaan milkiilaha waqti uu ku saxo ku xadgudubka/xadgudubyada. Ugu dambeyntii, waxay sameyn doonaan dib-u-kormeeris si ay u xaqiijiyaan in arrimaha la xalliyay.

Haddii milkiilaha hantida uu wado xalinta xadgudubka, waxaan sameyn doonaa kormeer kale. Haddii milkiilaha uu diido inuu wax ka qabto xadgudubka, Waaxda ISD waxay qaadi doontaa tallaabo sharci ah.

HADAFKEENNA

Waaxda Adeegyada Kormeerka (ISD) waxay ilaalisaa caafimaadka iyo badqabka ganacsiyada iyo bulshooyinka deegaanka ee Boston iyadoo si hufan oo joogto ah u dhaqan gelinaysa xeerarka dhismaha, guriyeynta, caafimaadka, iyo deegaanka.

QEYBAHA WAAXDA ADEEGYADA KORMEERKA (ISD)

Qeybta Dhismaha ayaa masuul ka ah ruqsadeynta iyo kormeerida dhammaan goobaha dhismaha ee Boston.

Qeybta Qorshayaasha & Seereynta waxay dib-u-eegis ku sameysaa arjiyadda ruqsadda si loo xaqiijiyo in ay waafaqsan yihiin xeerarka seereynta, xeerarka dhismaha, iyo xeerarka kale ee khuseeya.

Guddiga Racfaanka Seereynta wuxuu go'aamiyaa in mashruuc laga dhaafi karo xeerarka seereynta haddii u hoggaansanaanta ay keeneyso caqabado culus.

Qeybta Guriyeynta waxay dhaqan galisaa xeerarka si loo ilaaliyo heerarka fayadhowrka ee guryaha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

Qeybta Miisaanka iyo Cabbirka waxay fulisaa Xeerarka Guud ee Massachusetts ee la xiriira saxnaanta iyo miisaanka qalabka cabbiraadda sida miisaannada, mitirrada taksiyada, qalabka kaalimaha shidaalka, kuleyliyaha guryaha, iyo mitirrada gaadiidka saliidda.

Qeybta Deegaanka waxay dhowrtaa caafimaadka dadweynaha iyada oo ka ilaalinaysa Boston cayayaanka iyo jirka.

Qeybta Caafimaadka waxay dhaqan galisaa sharciyada cuntada iyo nadaafadda. Sidoo kale waxay kormeeraan oo ay ruqsadeeyaan ganacsiyada adeega cuntada siiya dadweynaha.

Qeybta Adeegyada Dadka Deegaanka waxay ka jawaabtaa weydiimaha dadka, fududeysaa sixitaanka xadgudubyada xeerarka Magaalada, martigelisaa aqoon-is-weydaarsiyo waxbarasho, oo ay baartaa cabashooyinka. Sidoo kale waxay la shaqeeyaan koox khubaro ah oo wax ka qabta arrimaha adag sida guryaha dhibaatooyinka wajahaya, cabashooyinka ku saabsan guryaha aadka isku dhexyaala, iyo guryaha sharci-darrada ah.

Booqo iviv.boston.gov/isd si aad u hesho buugaag-hagayaal ah oo luuqado badan ku qoran, u codsato ruqsad, u daawato casharro, ama aad wax badan uga ogaato shaqadeena.

